



# Talooyin Loogu Talogalay Dadka Aragga Naafka ah Wakhtiga Masiibooyinka

## Bakoorado

- Haddii aad isticmaashid bakoorad, kuwo dheeraad ah ku hayso goobo istarataaji ah, joogto ah oo ammaan ah oo ku yaala shaqada, guriga, dugsiga iyo goob tabaruc si ay kaaga gargaaraan inaad ka weecatid caqabadaha iyo waxyaabaha halista ah.
- Bakoorad kayd ah ku hayso xidhmadaada ama baakadaada degdega.

## Tilmaamo dhaqaaq oo beddel ah

- Haddii aad qabtid xoogaa ah arag, nalalka ammaanka dhig qol kasta si ay u iftiimiyaan jidka lagu soconayo. Nalalkaasi waxay galaan godadka korontada ee derbiga waxana ay si toos ah u iftiimaan haddii ay korontadu go'do. Waxay, iyada oo ku xidhan nooca, shaqeyn doonaan 1 ilaa 6 saacadood. Wuxuu kale oo lagu damin karaa gacanta ka dibna loo isticmaali karaa toosh ama karbuuno mudo gaaban.
- Kaydso tooshash/karbuunooyin awood badan oo leh iftiin balaadhan iyo baytariyo dheeraad ah.
- Qorsheyso in ka dib masiibo ay kaa lumaan tilmaamaha maqalka ah ee caadi ahaan aad isku halay jirtay.
- Wuxuu laga yaabaa in xayawaanka qofka u adeegga ay wareeraan, cabsoodaan ama jaho-wareeraan inta ay jirto iyo ka dib masiibo. Ku hay meel aanay ka baxsan karin ama si ammaan ah ha u hayo xadhig. Hogaan/xadhig waa alaab muhiim ah oo lagu maamulo xayawaan fiisaaq ama qasan. Isu diyaari inaad isticmaashid siyaabo beddel ah oo aad ku dhex martid deegaankaaga.

## Magac ku qor kaydka

- Haddii ay gargaar leedahay, kaydka degdega ku calaamadee far waaweyn, dhejiska ama sharootada iftiinta ama farta Indhoolaha (Braille).

## Kombiyutarada wax ku xidh ama ku adkee

- Qalabka gaarka ah iyo farnijarka weyn sida kombiyutarada iyo khaanadaha alaabta la saaro wax ku xidh ama ku adkee. Samee nidaam kayd kombiyutar oo loogu talogalay xogta muhiimka ah oo dhig meel ka baxsan goobta.

## Arrimo u-doodis

- U dood in warka telefishanku aanuu kaliya soo daynin lambaro telefon oo muhiim ah, balse uu si gaabis ah afka uga sheego oo marrar badan ugu celiyo dadka aan akhriyi karin shaashadda.



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-  
7890

Bogga Internetka:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

DOH Pub 821-004  
Somali